

## **ISBITAALKA NIUVANNIEMI**

Iyadoo la raacayo siduu dhigayo qodobka 11 § ee sharciga ku saabsan xuquuqda iyo jagadda qofka bukaanka ah leeyahay, wakiilka u dooda dadka bukaanka ah ee Isbitaalka Niuvanniemi waa **sooshaladda tel. +358408686149.**

Dadka bukaanka ah iskood ayey ula soo xiriiri karaan ama kalkaalisada ayey u sheegi karaan inay ula xiriirto qofka ah wakiilka u dooda dadka bukaanka ah oo (telefoon ahaan ama warqad ahaan ayaa lagula soo xiriiri karaa). Haddii loo baahdana wakiilka waxaa laga qabsan karaa ballan ah in shakhsi ahaan loola kulmo.

### **11 §**

#### **Wakiilka u dooda dadka bukaanka ah**

*Waax walba oo qabata hawlaha daryeelka caafimaadka waxaa waajib ku ah inay magacawdo qof ah wakiilka u dooda dadka bukaanka ah. Laba waaxood ama waaxo badan way wada yeelan karaa hal qof oo ka dhexeeya oo ah wakiilka u dooda dadka bukaanka ah.*

*Wakiilka u dooda dadka bukaanka ah waxyaabaha uu u xilsaaran yahay waa:*

- 1) inuu dadka bukaanka ah kala taliyo arrimaha la xiriira sida sharciga loogu isticimaalayo;*
- 2) inuu qofka bukaanka ah ka caawiyo arrimaha loola jeedo qaybaha 1 iyo 3 ee qodobka sharciga 10 §;*
- 3) inuu ka hadlo waxyaabaha la xiriira xuquuqda bukaanku leeyahay; iyo*
- 4) inuu sidiisaba u shaqeeyo sidii uu u horumarin lahaa xuquuqda bukaanka iyo siday xuquuqda bukaanku u hirgeli lahayd.*

Siduu dhigayo qodobka 10 § ee sharciga ku saabsan xuquuqda iyo jagada qofka bukaanka ah leeyahay, qofka bukaanka ah ee aan ku qanacsanayn sida loo daryeelay iyo sida loola dhaqmay ee daryeelka la xiriirta, wuxuu xaq u leeyahay inuu dacwo cabasho ah u gudbiyo qofka isbitaalka madaxda ka ah, qofkaas oo ah **dhakhtaradda madaxda ah ee magaceedu yahay Eila Tiihonen, Isbitaalka Niuvanniemi, 70240 Kuopio.**

### **10 §**

#### **Dacwo cabasho ah**

*Qofka bukaanka ah ee aan ku qanacsanayn daryeelka caafimaadka iyo daryeelka jirrooyinkiisa ama sida loola dhaqmay ee la xiriirta daryeelka caafimaadkiisa iyo jirradiisa, wuxuu xaq u leeyahay inuu dacwo cabasho ah u gudbiyo qofka madaxda ah ee u xilsaaran daryeelka caafimaadka ee waaxda waxqabadka ee daryeelka caafimaadka. Dacwada cabashada ah waa in wakhti caqligal ah xal lagaga gaaraa.*

*Samaynta dacwada cabashada ahi ma horistaageyso mana xadideyso xuquuqda uu qofka bukaanka ahi u leeyahay inuu arrimaha la xiriira daryeelkiisa iyo sida loola dhaqmay dacwada uu ka qabo u gudbiyo shaqaalaha maamulka dowladda ee u xilsaaran inuu dusha ka ilaaliyo in daryeelka caafimaadka iyo jirrooyinka hawshooda siduu sharcigu yahay loo sameeyo.*

*Haddii marka dacwada cabashada ah falanqaynta lagu samaynayo la arko, in sida qofka bukaanka ah loo daryeelay ama loola dhaqmay ay tahay mid ay ka imaan karto arrin ah masuuliyadda ku saabsan khasaaraha bukaanka oo waafaqasan sida loola jeedo sharciga khasaaraha bukaanka (585/86), masuuliyadda magdhowga khasaaraha ee loola jeedo sida uu dhigayo sharciga magdhowga khasaaraha (412/74), amaba ay ka imaan karto arrin ah dacwo ku soo oogid, ama iyadoo waafaqsan sharcidejinta xirfad ku shaqaysashada sida loola jeedo ee ah ka qaadidda xuquuqda xirfad ku shaqaysashada ama xadididda xuquuqda xirfad ku shaqaysashada, ama hab kale oo ciqaabmarin ah oo sharciga ku qoran, markaas qofka bukaanka ah waa in lagala taliyaa sida arrinta loogu gudbin karo shaqaalaha maamulka dowladda ama cidda hawl ahaan arrintan wax ka qabashadeeda ku shaqa leh.*